FAAFINTA RASMIGA

الجريدة الرسمية

DAWLAD PUNTLAND EE SOOMALIA

لولاية أرض بونت الصومال

Sanadka 19-aad. Garowe .19/8/2017. Lam.8.

**Faafinta bilwalba soo baxda جريدة الشهرية**

*Qaybt Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawladda Puntland*

Qiimuhu waaSh.So 10,000 rukun walba . Sanadkii waaSh.So 170,000 dalka gudihiisa, dalka dibaddiisaSh.So 500,000 rukunka la waydiisto, waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilawdaa 1-da January. Qiimaha qoritaanF.Rhalkiisadariyowixii ka yar waaSh.So 3,000, rukunkaiyo qoritaankawaxaa la waydiistaa qeybta maamulkaFaafinta rasmiga ah. Lacagta waxaa lagubixinayaa xafiiska canshuuraha barriga ee wasaaradda maaliyadda.

---

## TUSMADA

**Qaybta Koowaad**

**Ansixinta Xeerka Dhismaha hay'adda Xiriirka jaaliyadaha puntland.**

**Qaybta labaad**

**Xeer**

**Waxba ma leh**

**Qeybta Saddexaad**

**Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.**

**Waxba ma leh**

*Xeer LR .1. ee 19/8/2017, kuna saabsan ansixinta Xeerka DHismaha Hay'adda Xiriirka jaaliyadaha puntland.*

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

ولاية بونت لاند الصومالية

PUNTLAND STATE OF SOMALIA

Xeerka Lr.1. ee20/8/2017, kuna saabsan ansixinta Xeerka Dhismaha Hay'adda Xiriirka jaaliyadaha puntland.

Markuu arkay: DastuurkaDawladda Puntland qodobkiisa 80-aad;

Markuu arkay: Ansixinta Golaha Wakiilada Puntland ee Summad XGGW/DPLS/83/2017 Garowe,talaada. Date:15/08/2017;

Markuu tixgeliyey:Muhiimadda xeerkani u leeyahay Dawladda Puntland.

**Wuxuu soo saaray**

Xeerkan soo socda:

**Qodobka 1-aad**

GolahaWakiiladu waxay ansixiyeen Xeerka Dhismaha Hay'adda Xiriirka jaaliyadaha puntland;

**Qodobka 2-aad**

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala keydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyoXafiiska Garyaqaanka Guud ee DPL.

**Qodobka 3-aad**

Dhaqangalka Xeerkani wuxuu noqonayaa marka Madaxweynuhu saxiixo, laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee DawladdaPuntland..

**Prof Cabdiweli maxamad Cali Gaas.**
**Madaxweynaha Dawladda puntland.**

ولاية بونتلاند الصومالية مكتب الرئيس
Office of the President Puntland State of Somalia

DAWLADDA PUNTLAND

EE SOOMAALIYA

GOLAHA WAKIILADA

ولاية بو نت لاند الصومال

مجلس النواب

Xafiiska Guddoomiyaha

Office of the Speaker

*Ref:-*XGGW/DPL/ 83 / 2017 Garoowe, Talaada Date:- 15/ 08 /2017

Ku:- Madaxweynaha DPL Garoowe

Ujeeddo:- Ansixinta Xeerka Dhismaha Hay'adda Xiriirka Jaaliyadaha Puntland.

Guddoomiyaha Golaha Wakiilladu:-

| | |
|---|---|
| MARKUU ARKAY: | Dastuurka DPL Qodobka 64-aad Faqrada 1-aad. |
| MARKUU ARKAY: | Soo gudbinta Madaxweynaha ee Ref: - **MW/DPS/429/2017 ee July, 22/2017,** kuna saabsan Ansixin Xeer. |
| MARKUU DHEGEYSTAY: | Dooddii iyo Go'aankii Golaha Wakiilladu ku ansixiyey Kalfadhigii 39-aad fadhigiisii 21-aad ee 08/08/2017. Xeerka Dhismaha Hay'adda Xiriirka Jaaliyadaha Puntland. |

Wuxuu Guddoomiyey:

Ansixinta Xeerka Dhismaha Hay'adda Xiriirka Jaaliyadaha Puntland.

Allaa Mahad Leh

Guddoomiyaha Golaha Wakiillada
Speaker of the House of Representatives
PUNTLAND STATE

Md. Axmed Cali Xaashi

Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.

Tell:- +252 90 7799977, Email: hashi7999@gmail.com, puntlandparliament@gmail.com. www.puntlandparliament.net

DAWLADDA PUNTLAND
EE SOMALIYA

PUNTLAND STATE OF
SOMALIA

# XEERKA DHISMAHA HAY'ADDA XIRIIRKA JAALIYADAHA PUNTLAND

August 2017

# TUSMADA XEERKA DHISMAHA HAY'ADDA XIRIIRKA JAALIYADAHA PUNTLAND

## TUSMADA MAWDUUCA BOGGA

Qodobka 1-aad : Erey bixinta Xeerka....................................................................3

Qodobka 2-aad : Dhismaha Hay'adda Xiriirka Jaaliyadaha Puntland.....................................4

Qodobka 3-aad : Ujeedooyinka Hay-adda Xiriirka Jaaliyadaha Puntland ...............................4

Qodobka 4-aad :Madax-bannaanida Hay-adda ...........................................................4

Qodobka 5-aad : Astaanta Hay'adda......................................................................4

Qodobka 6-aad : Xarunta dhexe ee Hay'adda.............................................................5

Qodobka 7-aad : Xilka iyo waajibaadka Hay'adda.........................................................5

Qodobka 8-aad : Qaab-dhismeedka Hay'adda..............................................................6

Qodobka 9-aad : Magacaabista iyo xil-ka-qaadista Agaasimaha Guud..................................6

Qodobka 10-aad : Waajibaadka iyo awoodaha Agaasimaha Guud.......................................7

Qodobka 11-aad: Awoodda Agaasimaha Guud ee Hay'adda...............................................7

Qodobka 12-aad : Xilka agaasime waaxeedka Hay'adda..................................................8

Qodobka 13-aad : Dhaqaalaha Hay'adda....................................................................8

Qodobka 14-aad : Wada-shaqaynta ururrada qurbajoogta iyo Hay'adda..............................9

Qodobka 15-aad : Warbixinnada waxqabadka hay'adda..................................................9

Qodobka 16-aad : Burin Xeer...............................................................................10

Qodobka 17-aad : Dhaqangalka Xeerkan..................................................................10

# QODOBBADA UU KA KOOBAN YAHAY XEERKA DHISMAHA HAY-ADDA XIRIIRKA JAALIYADAHA PUNTLAND

## Qodobka 1-aad
## Erey-bixin

Micnaha ereyada hoos ku qoran haddii aan xeerkan dhexdiisa si kale loo fasirin waxaa loola jeedaa sida soo socota:

**Hay'ad:** waxaa loola jeedaa Hay'adda xiriirka Jaaliyaddaha Puntland.

**Qurba-joog:** waxa loola jeedaa dadka puntlanderka ah iyo kuwa ay isku aragtida siyaasadeed leeyihiin kuna dhaqan gobollada iyo dalalka shisheeye.

**Jaaliyad:** waxa loola jeeda wadarta bulsho qurbo-joog ah oo leh ku dhaqan-nidaam.

**Ururrada jaliyadaha**: waxa loola jeedaa ururrada habaysan oo ay ka kooban tahay jaaliyadda qurbajoogta.

**Agaasime guud:** waxa loola jeedaa mas'uulka ugu sarreeya Hay'adda xiriirka Jaaliyaddaha Puntland.

**Agaasime waaxeed**: waxa loola jeedaa madaxa xafiiska agaasinka oo qaabilsan qayb ka mid ah shaqada Hay-adda hoos yimaadana Agaasimaha Guud ee Hay'adda xiriirka Jaaliyadaha Puntland.

**Xafiiska/Xafiisyada**: waxa loola jeedaa "xafiiska"/ "xafiisyada" Hay'adda xirirka Jaaliyadaha Puntland.

## Qodobka 2-aad
## Dhismaha Hay'adda Xiriirka Jaaliyadaha Puntland

Waxaa xeerkan lagu dhisay Hay'adda xiriirka Jaaliyadaha Puntland oo xiriirineysa dhammaan qurbajoogta dawladda Puntland.

## Qodobka 3-aad
## Ujeeddada Dhismaha Hay'adda Xiriirka Jaaliyadaha Puntland

Ujeeddada hay'addan loo dhisay waa:

B) In la abuuro hannaan iyo habab toosan oo kor loogu qaadayo doorka qurbo-joogtu ka qaadan karaan maal-gashiga, kobcinta dhaqaalaha iyo horumarinta dawladda Puntland.

T) In la xoojiyo isku-duubnida jaaliyadaha qurbo-joogta Puntland iyo isku xirnaanshaha bulshada dibedda iyo gudaha Puntland ee Soomaaliya.

## Qodobka 4-aad
## Madaxbannaanida Hay'adda xiriirka Jaaliyadaha Puntland

B) Hay-adda xiriirka Jaaliyaddaha Puntland waa hay'ad dawladeed oo madaxbannaan lehna shaqsiyadeeda qaanuuneed, astaanteeda iyo shaabaddeeda u gaarka ah.

T) Hay-addu waxay kaloo leedahay qaabdhismeedka, xilalka, awoodaha iyo waajibaadka ku xusan xeerkan.

## Qodobka 5aad
## Astaanta hay'adda xiriirka Jaaliyadaha Puntland

Astaanta hay'adda xiriirka Jaaliyaddaha waxa weeye saddex garangarood oo isa-suran oo midabkoodu yahay: buluug, caddaan iyo cagaar.

## Qodobka 6-aad
## Xarunta Hay'adda Xiriirka Jaaliyadaha Puntland

B) Xarunta dhexe ee hay'adda xiriirka Jaaliyadaha Puntland waa caasimadda Puntland ee Garoowe.

T) Hay-addu waxay kaloo laamo iyo xafiisyo ku yeelan kartaa meelo kale oo ka baxsan xarunteeda rasmiga ah haddii loo baahdo.

## Qodobka 7-aad
## Xilka iyo waajibaadka hay'adda

Waajibaadka iyo awoodaha Hay-adda xiriirka Jaaliyaddaha Puntland waxaa ka mid ah inay:

B) Ka shaqayso xoojinta midnimada, wadajirka, isku-duubnida iyo iskaashiga jaaliyadaha qurba-joogta ee ku dhaqan dalalka dibedda.

T) Wacyigeliso, lana socodsiiso jaaliyadaha hadba xaaladda dalku ku sugan yahay xagga siyaasadda, dhaqaalaha, aafooyinka abaaraha, guulaha la gaarey iyo wax kasta oo macluumaad ah oo iyaga khuseyn kara.

J) Hirgeliso siyaasadda Puntland oo ku wajahan qurbo-joogta iyo nidaamyo dhiirigelinaya doorka firfircoon ee qurbo-joogta Puntland ka qaadan karto horumarinta dhinacyada badan ee dawladda Puntland ka koobban tahay.

X) U-hawlgasho ururinta iyo kaydinta macluumaadka iyo xogta ku saabsan qurba-joogta sida aqoontooda, xirfadooda shaqo, waayo-aragnimadooda iwm.

KH) Taabbageliso warbixin sannadeed iyo daraasad la xiriira hawlqabadka hay'adda loona gudbiyo dawladda Puntland sanad kasta bisha u dambeysa.

D) Ka-gacansiiso qurba-joogta Puntland xal-u-helidda dhibaatooyinka la soo gubboonaada intii suurtogal ah.

## Qodobka 8-aad

## Qaab-dhismeedka Hay'adda Xiriirka Jaaliyadaha Puntland

Hay'adda xiriirka Jaaliyadaha Puntland waxay yeelaneysaa kana koobban tahay xafiisyada soo socda:

B) Xafiiska Agaasimaha guud ee hay'adda xiriirka Jaaliyadaha.
T) Agaasimaha Waaxda Maamulka iyo Maaliyadda.
J) Agaasimaha Waaxda Xiriirka Jaaliyadaha iyo Qurbo-joogta.
X) Wakiillada dalalka iyo Qaaradaha.
Kh) Magacaabidda Agaasimayaasha waaxaha iyo wakiillada waxaa lagu magacaabayaa Xeer Madaxweyne ka dib markii uu soo jeediyo agaasimaha Guud ee hay'adda xiriirka Jaaliyadaha.
D) Xilka iyo waajibaadka Agaasime waaxeedyada iyo wakiillada dalalka iyo qaaradaha, waxaa lagu faah-faahinayaa Xeer-hoosaadka Hay'adda Xiriirka Jaaliyadaha Puntland.

## Qodobka 9-aad

## Magacaabista iyo Xil-ka-qaadista Agaasimaha Guud

B) Agaasimaha Guud waa madaxa ugu sarreeya hay'adda xiriirka Jaaliyadaha Puntland una madax-bannaan shaqadiisa waxaana hoosyimaada waaxyaha iyo dhammaan xafiisyada iyo shaqaalaha kale ee isla hay-adda xiriirka jaaliyadaha Puntland.

T) Agaasimaha Guud ee hay'addu wuxuu mas'uul uga yahay dawladda Puntland taabbagelinta iyo habsami u socodsiinta siyaasadda iyo aragtida dhow iyo tan fog ee dawladda Puntland ka leedahay jaaliyadaha Puntland.

J) Agaasimaha guud ee hay'addan waxaa lagu magacaabayaa xilkana looga qaadi karaa digreeto uu soo saaro Madaxweynaha dawladda Puntland.

## Qodobka 10-aad
## Xilka iyo Waajibaadka Agaasimaha Guud ee Hay'adda

Xilka iyo waajibaadka agasimaha guud ee Hay'addan waxaa ka mid ah:

B) Dejinta iyo hoggaaminta siyasaadda (*policy*) guud iyo haggidda maamulka hay'adda si ka tarjumaysa qorshaha dawladda iyo siyaasadda guud ee xukuumaddu ka leedahay arrimaha qurbo-joogta.

T) Kormeeridda iyo qiimaynta habsami u socodka hawlaha iyo waxqabadka hay'dda xiriirka Jaaliyadaha Puntland dalka gudihisa iyo dibeddiisaba.

J) Matalaadda rasmiga ah ee hay'adda, haddii uusan cid kale u idman.

X) Ka talo bixinta magacaabista wakiillada u matalaya Dawladda Puntland jaaliyadaha dibedda.

KH) Guddoominta shirarka kala duwan ee Hay'adda xiriirka Jaaliyadaha Puntland.

D) Soo saarista wareegtooyin, amarro, hagayaal, tilmaamo iyo hab-raacyo lagu turxaan bixinayo maamulka laguna hormarinayo Hay'adda.

R) Hubinta iyo ansixinta miisaaniyadda, kharash hawleedka, iyo xisaab-xir xilliyeedka hay'adda xiriirka Jaaliyaddaha Puntland.

## Qodobka 11-aad
## Awoodda Agaasimaha Guud ee Hay'adda

1. Agaasimaha Guud ee Hay-adda Xiriirka Jaaliyadaha Puntland wuxuu awood u leeyahay fulinta iyo dhaqangelinta dhammaan waajibaadka ku tifaftiran qodobka 7-aad ee isla xeerkan Hay'adda Xiriirka Jaaliyadaha Puntland.
2. Agaasimaha Guud ee Hay-addan wuxuu kaloo awood u leeyahay la socodka iyo hubinta shaqada madaxda xafiisyada Hay'addu ka koobban tahay iyo la-xisaabtankooda.

## Qodobka 12-aad
## Xilka Agaasime Waaxeedka Hay'adda

Xilka iyo waajibaadka agaasime waaxeedka waa inuu:

B) Si daacad ah u qabto xilka uu ku magacaaban yahay si dhammeystiranna u guto waajibaadka laga sugayo ka miro dhalintooda.

T) Agaasimaha guud ka caawiyo dejinta qorsheyaasha hay'adda iyo inuu qabto howl kasta oo loo diro lana xiriirta shaqadiisa.

J) Ka talo bixiyaa habka isticmaalka miisaaniyadda hay'adda.

X) Ka qaybqaato diyaarinta iyo fulinta qorshayaasha iyo barnaamijyada shaqo ee lagu hirgelinayo siyaasadda iyo ujeedooyinka hay'addu hiigsaneyso iyo ka warbixinta hawlaha la xiriira waxqabadka hay'adda xiriirka jaaliyadaha Puntland.

KH) Kormeeraa habsami-u-socodsiinta hawl-maalmeedka shaqaalaha hoose ee hay'adda xiriirka jaaliyadaha Puntland.

D) Diyaariyaa qorshe hawleedka waaxyaha isagoo la tashanaaya agaasimaha guud ee hay-adda.

## Qodobka 13-aad
## Dhaqaalaha Hay'adda Xiriirka Jaaliyadaha Puntland

Dhaqaalaha Hay'adda xiriirka Jaaaliyadaha Puntland wuxuu ka imanaya:

B) Dhaqaalaha looga qoondeeyo miisaaniyadda dawladda Puntland

T) Kaalmada ay ka hesho hay-adaha caalamiga ah, dawladaha shisheeye iyo ururrada wadaniga ah.

J) Kaalada ay ugu deeqaan qurba joogta dibedda iyo gudaha.

## Qodobka 14-aad

## Wada shaqaynta ururrada qurba-joogta iyo Hay'adda Xiriirka Jaaliyadaha Puntland

Hay'adda xiriirka Jaaliyadaha Puntland waxay wada-shaqayn waxqabad la yeelaneysaa:

B) Ururrada, guddiyada qurba-joogta iyo wakiillada dawladda Puntland ee wadammada dibadda.

T) Waddamada dibedda oo aysan ka jirin ururro qurba-joog, hay'addu waxay ka gacansiineynaa kuna dhiirigelineysaa siday u midoomi lahaayeen una dhisan lahaayeen urur qurba-joog oo iyaga matala una ilaasha danahooda iyo ahdaafta ay hiigsanayaan inay gaaraan.

J) Hay'addu waxay ku dhiirigelinaysaa ururrada qurba-joogta inay xiriir wanaagsan yeeshaan dhexdooda, is-caawiyaan isla markaasna dhowraan shuruucda iyo awaamiirta dawladaha ay dalalkooda ku dhaqan yihiin si kor loogu qaado sharafta iyo sumcadda ummadda soomaaliyeed.

X) Hay-adda xiriirka jaaliyadaha Puntland waxay u hawlgeleysaa siday xiriir wanaagsan ula yeelan lahayd ururrada kale ee soomaaliyeed oo aan ka soo jeedin Puntland si sare loogu qaado isku soo-dhowaanshaha qurba-joogta soomaaliyeed, taasoo saameyn wax-ku-oolnimo ku yeelan karta is-fahamka soomaalida joogta gudaha dalka iyo dibeddaba.

## Qodobka 15-aad

## Warbixinnada waxqabadka Hay'adda Xiriirka Jaaliyadaha Puntland

Hay'adda xiriirka Jaaliyadaha Puntland waxay u hawlgeleysaa diyaarinta warbixinno loo gudbinayo Madaxda sare ee dawladda Puntland sannad kasta bisha ugu dambeysa. Warbixinnada Hay'addu waxay ka xogwaramayaan:

B) Hawl-qabadka hay'addan sannadkii la soo gudbay, sida ka warbixinta hawlihii u qabsoomay iyo caqabadaha la soo gudboonaadey oo lala socodsiin waayey hawlaha fulintoodi hakadka gashay.

T) Heerka ay qurbo-joogtu kaga jiraan horumarka dalka iyo xaaladda guud ee qurbo-joogta Puntland ee dunida ku baahsan.

X) Tallaabooyinka la qaaday si loo horumariyo doorka qurbo-joogta Puntland.

KH) Tallooyinka ay soo jeediyeen iyo afkaarta kala duwanaan karta oo ay qabaan qurbo-joogta Puntland.

D) Macluumaad kasta oo kale oo loo arko lama huraan in lagu daro warbixin sannadeedka hay'adda.

## Qodobka 16-aad
## Burin

Waxaa la buriyey Xeer Kasta oo Ka hor imaanaya ama aan la socon karin Xeerkan.

## Qodobka 17-aad
## Dhaqangal

Xeerkani wuxuu dhaqangelayaa Marka Golaha Wakiilladu Ansixiyo Madaxweynaha Dawladda Puntland saxiixo, laguna soo saaro Faafinta rasmiga ah ee Dawladda Puntland.

**Dr. Cabdiweli Maxamed Cali Gaas**
**Madaxweynaha Dawladda Puntland**